*Taaj Mahaal* - "Qasri lagu dhisay Jacayl" oo noqdey Jawharkii Fanka Islaamka ee Hindiya
Jama Musse Jama, 19 Diisember 2024

Taaj Mahaal waa qudbi uu ka dul dhisan yahay qasri lagu hindisay jacayl taam ah oo ku yaalla dhinaca bari ee webiga Yamuna ee magaalada Agra, gobolka Uttar Pradesh, dalka Hindiya. Wuxuu gebi ahaanba ka samaysan yahay dhagaxa Marbalka cad. Waxa dhisay Shah Jahan (1628–1658), boqorkii shanaad ee boqortooyadii muslinka ahayd ee Mugaal, si uu hadh ugu noqdo qabriga xaaskiisii saddexaad ee Mumtaz Mahal oo uu aad u jeclaa, hadda se waxa uu hoy u yahay labadii xabaalood ee boqorka iyo xaaskiisa. Xabaasha boqorka waxa soo rartay inantiisii oo tidhi hooyo iyo aabbo ha iska ag dhowaadeen iyaga oo mayti ah jacaylkoodii awgood.



Qasrigani wuxuu ku fadhiyaa 27 hektar dhul ah, waxa ku jira Masaajid, guri martidu degto, goobo ciidanka nabadgelayada iyo shaqaalahu ku nool yihiin, iyo beero ubax qurux badan iyo biyo isdhexgalay fadhiyaan, oo si weyn loo ilaaliyey, dhismihiisuna waxa uu socdey 17 sannadood (1631-1648). 367 sannadood ka dib, waxa hadda lagu naanaysaa 'Jawharkii fanka


Islaamka ee Hindiya" oo ay UNESCO dhowaan ugu aqoonsatay goob dhowrsoon oo shaxanka adduunka ku astaysan.  Anigu waxaan soo booqday bishan Diisembar 2024ka.

Mumtaz Mahal may ahayn oo kaliya xaaskiisii saddexaad, waxay ahayd tay isu qabeen jacayl taam ah oo hir galay. Waxay dhimatay iyada oo garabkiisa taagan goob dagaal lagu jiro, oo intii dirirtu socotayna ay u umushay ilmihii 14aad, oo ahayd gabadha loo bixiyey Gauhar Ara Begum ee markii danbe xabaalohooda isu soo rartay. Mumtaz waxay ku umul aroortey goob dagaal. Boqor Shah Jahan wuxuu la noolaa murugo laba sannadood, kadib na wuxuu ku ballanqaaday, kana dhabeeyey, inuu jacaylkooda u dhiso astaan aan duugoobin. Hadda qasriga qudbiga Taaj Mahal waxa la yidhaahdaa waa astaantii jacaylka aan suulayn.

Waxa ka muuqda meel kasta oo qasriga ka mid ah yiqiin diimeed, shaxan sarreeya, iyo fandhismeed halabuurkiisu heersare yahay, oo ay ka muuqato maskaxda iyo maalka la geliyey. Labada xabaalood ee dadku arkaan ma aha kuwii dhabta ahaa oo waa qaar loo ekeysiiyey, waayo diin ahaan kuma saxna bay aaminsanaayeen in xabaasha dadku ku dul wareegaan oo taataabtaan. Xabaalihii dhabta ahaa ee labada ruux dadka uma furna oo way ka hooseeyaan halkan dadku arkaan, waxana ku dul dadan dhagaxaan dahab iyo dheeman ka samaysan oo aan dadka loo oggolayn inay farafareeyaan.



Qasriga albaabkiisa hore ee weyn waxa ku xardhan Suuradda Yaasiin. Waxa cajiib ah sida farta ku qoran xajmigeedu isu la beddelayo dhererka uu kuu jiro sadarka aad kolba maraysaa, si markasta isku si ishaadu u akhriyi karto. Labada albaab ee kala eegaya bari iyo galbeedka, iyo gudaha qudbigana waxa ku xardhan suuradaha As-Sumar, Al-Fatx, Al-Mulk, Al-Mursalaat, At-Takwiir, Al-Infitaar, Al-Inshqaaq iyo Al-Shamsi.




Dhagaxa gooniga ah ee Marbalka cad waxa laga keenay goobta macdanqodista Makrana ee Rajasthan (Hindiya). Dhagaxa macdanta adag ee qaaliga ah ee kala duwan ee lagu midabeeyey waxaa laga soo raray meelo kala duwan, waxa ka mid ah midabka cagaaran oo ah Malachite oo laga keenay Beershiya, midabka casuusta ah oo ah Jasper (Hindiya), casaanka oo ah Red Sandstone iyo Jade (Hindiya), cawlaanka oo ah Madarable (Hindiya), iyo madowga oo ah Onyx oo laga soo raray Beljam. Dhagaxaantaa qaaliga ah ee ku dhex xardhan Marbalka cad ee aad mooddo farshaxanka sawiran, ma aha sawir e waxa loo qorey dhagax kasta farsamogacmeed gabowday oo ay wali sii hayaan dadka Hindiya. Waxa dhisay farsama yaqaanno Eeraan ka soo jeeda oo wali tafiirtoodii ku dhaqan tahay Agra si ay u ilaaliyaan oo dib ugu habeeyaan

shaxanka asalkiisa. Tafiirtaasi waxay jimce kasta tagaan Qasriga oo ay eegaan in quruxda dhagaxaanta la dhaawacay, way beddelaan hadday dalxiisayaashu taataabteen.



Quruxda Qasriga waxa bilay wanqaranka qaabdhismeedkiisa. Wax kastaa si laba waaxood oo isu jawaabaya ayay ugu wanqaran yihiin xuddun tilmaaman. Afarta dhidib ee cirka eegayaa lababa dhinac bay minaaradda dhexe ee qasriga ka eegayaan, oo isku in u jiraan, isuna dhumuc leeg yihiin. Halka aad iska taagtoba waxa kuu muuqanaya sidey u siman yihiin waaxyuhu. Quruxda Eebbe ku abuuray qofka bini-aadamiga ah waxa sal u ah sinnaanta wanqaranka. In indhuhu u siman yihiin sanqaroorka, sanka labadiisa dulna u siman yihiin caaradiisa, labada

dhegoodna isugu jawaabayaan sida labada garab, labada gacmood, labada lugood, sakaarka iyo labada awlal, iyo in jidhkoo dhammi xuddunta ku wanqaran yahay, waa quruxda ruuxa bini-aadmiga. Haddii meeli kala dheertay, oo wanqaranku jabo, quruxdaasi way kala dhantaalantaa. Sidaa waxa ka dhigan aasaaska xisaabta shaxan wanqaran oo sida dheemanta dhinacyadeedu isu wada leeg yihiin, shaxanka wejiyadiisu na isku wada sar go'an yihiin. Qasrigan waa waxa xuddun dhexaad u ah albaabka ay suuradda Yaasiin ku xardhan tahay, waax kastoo kalena way ku wanqaran tahay xudduntaas. Bal eeg sawirka hadhka qasriga ee ku soo dhacaya biyaha ka hooseeya, ee labada dhinac beeraha isleegi ka xigaan?

Ilbaxnimadii Islaamka ee boqortooyadii Mugul ee Koonfurta Eeshiya ka talinaysay laga bilaabo 1526kii ilaa 1857kii waxa ay caan ku ahaayeen fandhismeed ay sal u tahay astaamaynta ku aroorta diinta, waxana ay ka soo minguuriyeen Beershiya, tusaale ahaan, fekredda 'Beertii Jannada' (eeg tusaale ahaan *Timurid Garden* amase *Charbagh Paradise Garden*). Fandhismeedkan waxa sal u ah sida Jannadu ugu sheeggan tahay Quraanka, oo ku tilmaamay afar webi iyo afar beerood meel ay ku kulmeen, dhir badanina ku taallo, biyuhuna u yihiin shay aasaasi ah. Fandhismeedka Taaj Mahaal wuxuu ku salaysan yahay fekraddan beeraha ku wanqaran wajahadda ee biyuhu kala qaybiyaanna waa afar, afarta weelbiyood ee biyuhu ku wareegayaanna waxay ku kulmayaan wajahadda qasriga.



Jawiga dhowrsoon, dabeecadda, meesha uu ku yaallo qasrigu iyo sida loo xannaaneeyey waxay soo jiiteen quruxda kale ee dabiiciga ah. Waxaan ku dhex arkay shimbirka Daa'uuska oo si shaxshax badani ka muuqato ugu dul laafyoonaya doogga ka beeran beeraha. Waxaase i xiise geliyey shimbirta yaryarada ah ee codka macaan, quruxda badan ee la yidhaahdo *Tickell's Blue Flycatcher*, oo mar ay ku dul fadhiday qasabadda beerta waraabisa, sawirka aan ka qaaday aad mooddo inay dabeecadda iyaduba ka mid tahay. Shimbirtani waa cajiib: codkeeda aad moodo sanqadha bir la garaacay dhawdeeda kowaad, waxay raacisaa lix ilaa toddoba cod oo kala duwan, oo sameeya hees cajiiba ah. In yar ka dibna shimbirtaas ood mooddo inay astaanta jacaylka matalayso, ayaa inta ay laba ka mid ahi si xarrago leh isu soo eryadaeen hortayda, iyaga oo aan duulin, afka isu saareen sidii laba isjecel oo isdhunkanaya sida sawirka ka muuqata. Quruxda dabeecadda noolaha iyo ma-noolaha ayaa isugu yimi goobtan oo isla fal galay, nasiibkayga, subaxnimadan quruxda badan leh, ee durba cadceeddii barqo na diirisey.







Waa goob si weyn loo ilaaliyey, waxana soo booqda inta u dhaxaysa 7 ilaa 8 milyan sannadkii, dhaqaalaha waddanka iyo magaaladana lafdhabar buu u yahay qasirgan iyo dalxiisku. Anigu waxaan soo booqdey salaaddii subax, maalintii sabtidii 14ka diisembar, 2024, sugayayna ilaa intii cadceeddu soo baxaysay. Waaberi ka bilicsan ma aan hore u soo arag. Quruxda cadceedda soo baxaysa, webiga dhinaciisa, fallaadhaha ugu horreeya ee waaberigu markay ku dhacaan dhagaxa Marbalka cad ee qasriga, waxay u yeelaan midab casuus ah oo isu-ekaysiin ah. Haddana kolkay cadceeddu qof jooggii joogto, ayuu midabka Marbalka ee caddi isu ekeysiiyaa buluug. Markay cadceeddu ku soo wada baxaday, ee ay barqo tahay na, caddaankiisii lagu yaqaannay ee dhuuxa ahaa ayuu isu rogaa. Intaas ba ishaydu marag bay u ahayd. Waxay ahayd booqasho ka duwan meelo kale oo badan oo adduunka ah oo aan soo arkay, waxaanaan soo xaqiijiyey in Qudbiga Taaj Mahal ee Qasriga ahi yahay Jawharkii Fanka iyo Shaxanka Islaamka ee Hindiya iyo Adduunka.

*Waaberiga Taaj Mahal - sawirro*

